

IDRS Infectious Disease Reporting System

Disease Reporting 24 Hours a Day

Columbus Public Health and Franklin County Public Health

XIIQ DHEER

Xiiq Dheer, waa cudur la xariira neefta oo aad leysugu daarto, waxaana ka dambeeyo bakteeriyaha *Bordetella pertussis*.

Calaamadaha

Badanaa calaamadaha lagu yaqaan waxay soo baxaan 7-10 maalin kaddib marka la qaado bakteeriyaha, sida:

- Calaamadaha hore waxay u shabahaan hargabka caadiga, sida hindhisada, diifka, qandhada qabooban iyo qufaca.
- Muddo hal ilaa labo todobaad:
 - Qufac aad u darran ama qufac badan oo degdeg ah
 - Qufac uu ka dambeeyo "qaaxo" aad u dheer
 - Qufac aad u adag ilaa heer uu qofka xanuunsan neefta ku ceshoonto ama mattago
- Waxaa dhici karto in dhacdooyinka soo noqnoqdaan muddo hal ama labo bil, inta badan waxay soo noqnoqdaan habeenkii.
- Waxaa dhici karto in dadka qaar sida dhallaanka yaryar, caruurta dugsiga ee la tallaalay, dhallinta, iyo dadka waaweyn, in aysan qabin qufacaan soo noqnoqda. Waxaa dhici karto in dhallaanka la kulmaan hakadyo xagga neefta in ka badan qufaca.

Gudbinta

- Xiiqleyda wuxuu aasaasiyan faafaa marka xariir toosan lala sameeyo dareere ka soo baxa sanko iyo dhuunta qof qaaday cudurka.
- Diifka ka soo baxa sanko ama dhuunta wuxuu galaa hawada marka qofka xanuunsan qufaco, hindhiso, ama hadlo. Dadka u jira 3 cag qof xanuunsan waxay gaarsiin karaan qufaca kaddibna qofka wuxuu qaadi karaa cudurka.
- Halista ugu badan faafida waxaa lala kulmaa marxaladaha hore ee cudurka marka calaamadaha u shabahaan qufaca caadiga.
- Qofka wuxuu gudbin karaa xiiqley laga bilaabo marka uu muujiyo calaamadaha ilaa saddax todobaad, kaddib marka qufaca bilowdo. Waqtigaan waxaa loo dhigi karaa hoos ilaa laga gaarsiiyo shan maalin kaddib marka daweynta antibiyootikada ku habboon bilaabato.
- Qofka lagu ogaado in uu qabo xiiqley **WAA** in laga reebo dugsiga iyo/ama xarunta xanaanada cunugga inta uusan awood u yeelanin in uu gudbiyo xiiqleyda.

Daweynta

- Qofka qaba xiid dheer waa in la siiyo antibiyootiko ku habboon si loo yareeyo awoodda uu u leeyahay in uu faafiyo cudurka. Azithromycin, erythromycin, iyo clarithromycin waa dawooyinka la jecel yahay ee loo qaato xiiqleyda, inkastoo ay dhici karto in takhtarkaada kuu qoro antibiyootiko kale haddii aadan qaadan karin mid ka mid ah dawooyinka.
- Xubnaha reerka iyo qaraanada qof lagu tilmaamay in uu qabo xiid dheer waxay sidoo kale u baahan yahiin in ay qaataan antibiyootiko si looga hortago in ay ku dhacdo xiiqley. Sokkeeyaha waa qofka xariir wiji ka wiji la yeeshay ama meel kooban la wadaagay, muddo dheer, qof qaba calaamadaha. Sokkeeyaha waxaa kaloo ka mid ah dadka xariir toosan la yeesha dareere ka yimaad afka, sanko, iyo dhuunta qof qaba cudurka.
- Dawooyinka ka soo horjeedo qaadeyaasha cudurka (antimicrobials) waxaa sii dheer in reerka iyo sokkeeyaasha horay u qaatay ugu yaraan afar qiyaas talaalka xiiqleyda loo baahan yahay in la siiyo qiyaasta xoojiyaha (DTaP) haddii aan la siinin qiyaas saddaxdii sanno ee la soo dhaafay. Weydii takhtarkaada talaalka aad heli kartid.

Macluumaad Dheeraad ah

- Dhallaanka yaryar waxay ku jiraan halis badan in ay la kulmaan dhibaatooyin, ka mid ah dhibaatooyinka qabooban sida cudurada dhagta, cunto xumada, iyo biyo baxa, ama dhibaatooyin culus sida wareentada, qabatiinka, cilladaha maskaxda, iyo dhimasho.
- Sida ugu fiican oo looga hortago xiiqleyda waa in la hubiyo in dhamaan qoyskaada la talaalay waqtiga laga loo baahnaa. In talaalka ugu dambeeyo laga qaato xiiqleyda waxay aad u yareysaa fursadaha in aad qaadiid xiiqley, iyo waxay qaboojisaa cudurka haddii uu kugu dhaco.

Dhamaan macluumaadka waa guud mana loogu talogalin in loo isticmaalo in lagu baddalo waanada qofka aqoonta leh.



c/o Franklin County Public Health, 280 East Broad Street, Columbus, Ohio 43215-4562

Call: (614) 525-8888 • After Hours: (614) 525-3965 • Fax: (614) 525-8890

Email: idsr@franklincountyohio.gov • Web: www.idrsinfo.org



COLUMBUS
PUBLIC HEALTH